

Daaweynta iyo Taageeridda Baaxada Cudurrada Autism (Autism Spectrum Disorder - ASD)

Minnesota Department of Human Services
Early Intensive Developmental and Behavioral
Intervention (Somali)

**Kahortagga hore ee
Dakhsaha ah ee Koriinshaha
iyo Dabeecadda wax ka
Qabadkooda (Early Intensive
Developmental and Behavioral
Intervention - EIDBI)**

Waa maxay nacfiga EIDBI?

Nacfiga EIDBI wuxuu daaweyn/la tacaalid u sameeyaa dadka qaba ASD iyo xaaladaha caafimaad ee la xiriira. Daaweyntu waxay ku saleysan tahay hab la soo xaqiijiyay, oo qiimeynaya, dhaqanka iyo waxa qofku ama qoysku doorbidayaan.

Yaa heli kara adeegyada EIDBI?

Si aad ugu qalanto adeegyada EIDBI, qofku waa in:

- Uu ka yaryahay 21 sano jir
- Uu qabo ASD ama xaalad la xiriirta
- Uussan u baahnayn la socod caafimaad 24-saac
- Uu heysto Medical Assistance – MA (Gargaarka Caafimaadka) ama MinnesotaCare
- Lagu go'aamiyay qiimeynta caafimaadka gobalka in uu u qalmo

Sidee bey adeegyada EIDBI u caawin karaan qof qaba ASD ama xaaladaha la xiriira?

Adeegyada EIDBI waxay diirada saaraan taageerada ka caawin karta qofka in uu:

- Dadka kale la dhaqmo
- Waxbarto ciyaarana
- Wanaajiyo wadhadalka aasassiga ah
- Madax-banaani samaysto
- Diiradda saaro yoolalka u hogaamiya hormarka tayada nolosha qofka
- La tixgeliyo waxa ay daneynayaan ee ku saabsan qoyska dhexdiida, iskoolka iyo nolosha jaaliyadda

Sidee baan ugu dalbi karaa cunugeyga ceymiska xanaanada caafimaadka?

Medical Assistance (MA) iyo MinnesotaCare waa barnaamijyo caafimaadka bulshada ah oo loogu talagalay dadka u qalma ee ku nool Minnesota. Ceymiska caafimaadka wuxuu cunugeyga siinayaa helitaanka adeegyo caafimaad, oo ay ku jiraan nacfiga EIDBI. Ka buuxi arji boga internetka ee www.mnsure.org

Fadlan sida ugu dhakhsaha badan u dalbo.

Haddii aad qabto su'aallo ama aad u baahan tahay caawinaad ah buuxinta arjiga, wac **Minnesota Health Care Programs Member Help Desk (Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota Miiska Caawimaada Xubnaha)** ee **651-431-2670** ama lambarka bilaashka lagu waco ee **1-800-657-3739**.

Hadii aad u baahan tahay caawinaad luuqada ah, codso adeega turjubaan in lagu dalbo.

Sidee baan u dalbadaa adeega EIDBI?

Si aad usameysato balan ah qiimeynta caafimaadka gobolka ama aad u hesho daryeel bixiye degaankaaga degan:

- Booqo boga internetka ee www.minnesotahelp.info oo isticmaal erayga furaha ah ee "EIDBI".
- La xiriir deqmadaada ama Heyadaha Qabaaalka Calibeysteenka Kuwaasoo kugu xiri kara ilaha ama adeegyada degaankaaga laga helo. Ka eeg Xogta lagala xiriirayo degmada iyo Heyadaha Qabaaalka Calibeysteenka diiwaanka laga helo barta:
www.mn.gov/dhs/people-we-serve/adults/health-care/health-care-programs/contact-us/county-tribal-offices.jsp

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nacfiga EIDBI?

Si aad u barato wax dheeraad ah oo ku saabsan nacfiga EIDBI, oo ay ka mid yihiin:

- U Qalmidda
- Ilaha
- Macluumaad ku saabsan sida aad isu diiwaan galin kartid si aad u noqoto daryeele EIDBI
- Kooxda Talobixinta EIDBI (EIDBI Advisory Group)

Booqo boga internetka EIDBI ee:

www.mn.gov/dhs/eidbi

Ma u baahan tahay ilo dheeraad ah?

Disability Hub (Xarunta Naafada) ayaa kaa caawin kara in aad hesho ilaha ama jawaabaha su'aalahaada ku saabsan waxyaalo dhowr ah oo ay ka mid yihiin:

- Adeegyada dhaqaalaha
- Gargaarka Caafimaadka
- Helida daryeelayaasha
- Adeegyada sharciga
- Guriyeyn
- Shaqaaleyn

Disability Hub MN

Waqtiyada la helo: 8:30 subaxnimo-5:00 galabnimo, Isniin-Jimco

Internetka: disabilityhubmn.org

Telefoon: 1-866-333-2466

Macluumaadka la xiriiridda

limeyl: ASD.DHS@state.mn.us



Si aad qoraalkaan ugu hesho qaabab kale oo aad isticmaali karto iyo helitaanka loo simanyahay ee adeegyada aadanaha oo dheeri ah, qoraal u dir dsd.responsecenter@state.mn.us, wac 651-431-4300 ama 1-866-267-7655 (toll free), ama isticmaal adeega lalinta ama isgaarsiinta wararka ee aad doorbideyso. (ADA1 [9-15])